

Deeqda cusub ee muraayadaha indhaha

- su'aalo & jawaabo

1da maarso 2016 waxaa dhaqangelaya sharci cusub. Kaasi wuxuu la micne yahay in xataa carruurta iyo dhallinyarada da'doodu tahay 8 ilaa 19 sano ay xaq u leeyihiin deeqda muraayadaha indhaha.

1. Goorma ayey helidda deeqdani bilaabaneysaa?

Dhaqangalka sharcigaan wuxuu ka bilaabanayaa 1da maarso 2016. Maamul caafimaad ee gobol walba waa in bixiyaa deeq loogu talagalay muraayadaha indhaha oo horay kharashkooda loo bixiyey **kadib** 1da maarso.

2. Sharciyadee ka jira gobolka Västernorrland?

- Deeqdaasi waxay gaareysaa **ugu badnaan** 900 karoon/sannadkii. Haddii qiimaha muraayaduhu uu **hooseeyo** waxaa kolkaas la helayaa deeq u dhiganta kharashkii dhab ahaan laga bixiyey.
- Qofku isaga ayaa iska bixinaya kharashka dheeraadka ah oo ku baxa dhegaha muraayadaha, dayactirkooda ama la adkeeyo, midab loo yeelo ama laga dhigo kuwo iftiinka aan ku cawirmin.
- Deeqdaan laguma bixinayo kharashka muraayado indhaha oo waxyeelo soo gaartay ama lumay ama kharashka muraayado indhaha oo dheeraad ah.

3. Yaa heli kara deeqdaas oo sidee loo doontaa?

Sharciyadaan cusubi waxay khuseeyaan carruurta iyo dhallinyarada da'doodu u dhaxeyso 8 ilaa 19 sano. Carruurta intaas ka yari sidii horeba xaq ayey u leeyihiin deeqdaas. Haddaba si loo helo muraayadaha indhaha ama kuwa indhaha la dhexgeliyo waa in waqti laga qabsadaa aqoonyahan muraayadaha indhaha oo ruqsad. Aqoonyahankaas muraayadaha ayaa go'aaminaya haddii ay jirto baahi loo qabo muraayado indhaha. Muraayado sax ayaa la isku cabbirayaa, kadibna aqoonhayanka muraayadaha ayaa warqad qoraya.

Xoghaynta Maamulka gobolka ee arrimaha caafimaadka, qaybta caafimaadka iyo daryeelka bukaanka.



Daabacaadda Zaadi: 2016-06-10

Warqaddaas aqoonyahanka indhuhu qoray waxaa la raacinayaa warqad gundhigga qiimaha oo aqoonyahanka muraayaduhu u dirayo maamulka caafimaadka bulshada.

4. Sidee wax looga heli karaa deeqdaas?

Aqoonyahanka muraayaduhu wuxuu qiimaha la bixinayo ka jarayaa qaybta deeqda oo uu qaybtaas deeqda ka dalbanayo maamulka gobolka Västernorrland ee caafimaadka bulshada:

3. Waqti dambe ma la codsan karaa deeqdaas?

Qofka muraayado indho ugu soo qaaday qof carruur ama dhallinyaro ah kadib 1dii maarso 2016, gadaal ayuu ka codsan karaa deeqdaas. Barta www.lvn.se waxaa laga helayaa foomka wareejinta arrintaas. Risiidkii lagu bixiyey iyo warqadda aqoonyahanka muraayadaha ayaa la soo raacinayaa foomka. Kadib waxaa warbixin loo dirayaa xafiiska dhaqaalaha ee maamulka arrimaha caafimaadka ee gobolka oo lagu dirayo adareeska ku qoran foomka.

5. Maxaa khuseeya carruurta qaxootiga keligood yimid, kuwa magangelyadoonka ah iyo dhallinyarada sharci-la'aanta ah.

Dhammaan carruurta iyo dhallinyaradu waxay xaq u leeyihiin deeq iyo in taasi la micne tahay in uu iyagana sharciga cusubi khuseeyo. Dadka magangelyadoonka ahi waxay sheegayaan lambarkooda LMA, dhallanka keligood yimid iyo kuwa sharci-la'aanta ahi waxay sheegayaan taariikhda ay dhasheen.